ACLU Maine

**Innaga Meel uma socono waxaan ka tirsan nahay halkaan:**
Ciribtirka Sinnaanta Waxbarashada ee Loogu Talagalay Dadka Soo Galootiga ah iyo Ardayda Midabka ee Maine

---

**SOO GAABSAN**

**I. Ulajeddoyinka iyo Xadka**

Warbixintan waxay sahaminaysaa waayo-aragnimada ardayda ee iskuulada Maine oo leh kala-duwanaansho, dhaqan, luqad iyo asal jinsi. Xogta laga soo qaatay waraysiyo in ka badan 115 qof (ardayda, waalidiinta, hoggaamiyeyaasha bulshada, barayaasha, iyo maamulayaasha), waxaan qeexeynaa midabtakoorka ay la kulmaan ardayda laga tirada badan yahay ee Maine.

Waxaan sidoo kale sharaxnaa barnaamijyada qaar dugsiyadu ay hirgeliyeen si wax looga qabto sinaan la'aanta. Waxaan diirada saareynaa barnaamijyada guuleysta ee ka yimaada gobolada kale iyadoo la awoodo in si ballaaran loo qaadan karo.

Xogta waxaa ugu horreyn laga soo qaatay afar qaybood:

1. Degmo dugsiyeedka leh boqolkiiba inta ugu sareeya ee Barteyaalka Af Ingiriisiga (*English Language Learner* - *ELL*) iyo ardayda aan caddaanka ahayn
2. Iskuulada la gudboonaatay kororka ugu weyn ee labadan qaybood
3. Iskuullada ay ardaydu ka soo sheegteen si ay ula wadaagaan cabashadooda
4. Iskuulada barnaamijka guuleysta ay u baahan yihiin in la siiyo awood feejignaan gaar ah.

Waxaa ka mid ah Auburn, Bangor, Belfast, Biddeford, Calais, Gardiner, Gorham, Lewiston, Maamulka iskuulaadka Degmada Maine (*Maine School Admininstrative District* - *MSAD*) 37 (Addison, Columbia, Columbia Falls, Harrington, iyo Milbridge), Portland, South Portland, iyo Westbrook

Daraasaddeenna waxaan diiradda ku saarnay ardayda soo galootiga ah. natiijo ahaan, warbixintan ayaa ugu horeyn diiradda saareysa ardayda la kulma midab kala-saar sababo la xiriira jinsiyadooda, diintooda, asal ahaan, ama xaaladda sida Barteyaalka Afka Ingiriisiga.

Si kastaba ha noqotee, noocyada dhibaataynta iyo ka-saarista ee muhaajiriinta iyo ardayda midabka ah ayaa sidoo kale la soo darsey dumarka qaniisiinta ah, raga qaniisiinta ah, jinsi ahaan ka hela galmada rag iyo dumar, qof aan loo aqoonsan karin lab ama dhaddig jinsiga ahaan leh tilmaamaha labada jinsi ee rag iyo dumar, iyo mid khilaafsan ama ka duwan astaamaha rag ama mid dumar (*lesbian, gay, bisexual, transgender, iyo queer* - *LGBTQ*) ardayda, ardayda naafada ah, iyo ardayda dakhligoodu yar yahay. Qaar badan oo ka mid ah hababka ugu fiican ee aan halkan ku muujin karno waxay sidoo kale u adeegi karaan hagaajinta khibradaha ardaydaas.

Waxaan rajeyneynaa in warbixintan ay u noqon doonto qalab loogu talagalay ardayda, qoysaska, iyo barayaasha si ay u gaaraan sinnaan badan oo dugsigooda ah.

## II. Natiijooyin

Cilmi-baaristeyna waxa ay dusha ka qaaday dhibaateyn iyo kala-saar dhamaan dugsiyada ku yaala gobolka iyo heerarka fasal kasta. Arday badan oo midab leh ayaa waxay la kulmaan xumaan joogto ah oo xoogsheegasho ah, iyo sidoo kale dhaqan lagu muujinaayo in aan la dooneynin iskuulka.

Ardayda Muslimiinta ah waxay ku qeexeen ardayda kale inay ku riixaan qolalka dhexdooda, iyaga oo ugu yeeraya argagixisada, iyo inay isku dayaan inay ka jiidaan daboolka madaxooda. Ardayda midabku waxay ku sharaxeen in ardayda caddaanka ah ay u sheegaya inay "ku noqdaan Mexico" ama waxay ku hanjabeen in ay masaafurinayaan. Mid ka mid ah ardayda madow waxay ku qeexeen ardayda aaney ogeyn in ay soo gaarsiisay timaheeda iyo googosheeda timaheeda iyadoo ay ku socotay hoolka iskuulka. Hadal nacayb ah, oo ay ka mid yihiin tilmaan jinsiyad nacayb jinsiyadaha iyo kalmado liidis ah oo muhaajiriinta iyo dadka jinsiyadaha laga tirada badan yahay,ay ku badan tahay ama caadi ka tahay.

Labaduba Dhibaataayn furan iyo mid dadban oo u eexasho ah oo ay soo bandhigeen macalimiinta iyo shaqaalaha, sida macallinka had iyo jeer u ogolaada fasaxa suuliga (musqusha) ardayda caddaanka ah ardayda kale ha hor.

Takooridda ama kala-saarka waxay u fiday fasalka dibadiisa, sidoo kale. Dhowr qoysaska soo galootiga ah waxay ku muujiyeen darawaliinta baska ee diiday inay carruurtooda soo qaadaan, ama ku dacweeyaan maamulayaasha iskuulka in carruurtu ay si xun u urayaan oo ay leeyihiin dabeecad xun. Hal hooyo ayaa ku sharaxday arinkaan darawalka baska iskuulka in carruurta kale uu ku dhiiro galiyo in cunugeeda la foorjeeyo.

Arday dugsiga sare dhigta oo muslim ah ayaa garsoore kubbadda cagta ah u sheegay in aysan ciyaari karin haddii aysan xijaabka madaxa iska saarin. Arday kale oo muslimim ah ayaa waxaa u sheegay macalinka dabaasha in aysan ku biiri karin kooxda sababta oo ah waxay rabtay in ay ka kor xirato surweel-laastiig ah dharka dabaasha.

Tallabooyinkaas ma aha oo kaliya gef ama weerarid, iyagoo sidoo kale sharci-jebin ku ah sharciyada federaalka iyo kuwa gobolka.

Mid ka mid ah farqiga udhexeeya jinsiyadaha iskuulada waa aadaabta. Ardayda madow waxay u badan tahay in ay la kulmaan in iskuulka dhaxiisa laga joojiyo galaaska iyo in iskuulka laga hakiyo, ka-cayrin, iyo in loo gudbiyo hay,ada sharci ilaalinta iyo in la marsiiyo ciqaabta jirka mid ka badan cadaanka la midka ah, ee dabeecadaha isku midka ah leh.

Ardaydu waxay dareemaan in cabashadooda ku saabsan dhibaataynta aan loo qaadan si muhiim ah. Waxay yiraahdaan macalimiinta iyo maamulayaashu waxay ula dhaqmaan dhacdo kasta sida mid gooni u dhacda, halkii ay ka ahaan lahayd qayb ka mid ah guud ahaan, dhaqanka dhibaatada iskuulka. Ugu dambeyntii, ardaydani waxay soo gabagabeynayaan in dadka waaweyn ee iskuulkoodu aanay ka fikirin midib kala-saarka, waxayna xitaa u oggolaadeen usaamixid. Sida hal arday oo muslimiin ku sharaxay, "In badan oo naga mid ah waxaa ka luntay kalsoonidii iskuulka, sababtoo ah qofna waxba kama qaban. Waan u tegi jiray maalin kasta, laakiin weligood waxba kama qaban.’’

Shaacsanaanta takooridda ama kala-saarka ee dugsiyada Maine iyo la'aanta nidaamyada ka hor imaadka xoog-u-sheegashada waa cillado niyadjab ah, waxayna sidoo kale burinayaan sharciyada federaalka iyo gobolka. Sharciga Maine wuxuu dhigayaa, "Ardayda oo dhan waxay xaq u leeyihiin in ay dhigtaan iskuulada dadweynaha Amaanka ah, ammaan iyo deegaan nabadgelyo ah." Iskuuladu waxay leeyihiin waajib sharci ah inay wax ka qabtaan midabtakoorka ku salaysan wadanka aad ka timid, jinsi, diin, naafo ama cuuryaan, jinsigaada galmada, iyo jinsiga. Kuwa ku fashilmay inay diyaar u noqdaan in ay furaan baaritaankaan Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Maine, dacwadaha ardayda, iyo xukumidda Waaxda Waxbarashada iyo Caddaaladda ee Maraykanka.

## III. Talooyin

Waxaanu qaabeynay qaybta talo-bixinta ee warbixinteena ku saabsan barnaamijyada diiradda lagu saaray saddex siyaabood: baraha iyo baraarujiyaha iyo wacyigelinta iskuulka bulshada; sinnaanta helitaanka iyo natiijooyinka; iyo wacyogelinta waalidka iyo qoysaska. Mid kasta oo ka mid ah siyaabahaan waxaan qeexeynaa dhibaatada la cayimay waana sharaxeynaa qaar ka mid ah barnaamijyada guulaystay oo iskuulada maine ay hirgeliyeen si wax looga qabto dhibaatadaas.

Sababtoo ah qaar ka mid ah intooda badan dhibaatooyinka isdhexgalka waxa uu ka bilaabmaa garasho la, aan, tababarada xirfad dhaqameedka iyo aqoon-isweydaarsiyada ku saabsan jinsiyadda ayaa muhiim u ah horumarinta sinnaanta iskuulaadka. Barnaamijyada aan kor ku xusnay waxaa ka mid ah seminaaro horumarin xirfadeed oo macallimiintu diiradda ku saaran taariikhda jinsiyada Maraykanka iyo saameynta ay ku leedahay waxbarashada; waxqabadyo abuuraya bulshada ardayda

dhexdooda iyaga oo meelo kala duwan ka kala yimid; qorshoyin ay kaga hadlaan sheekooyin; iyo dadaalada lagu ururinaayo oo lafagurayo xogta si loo fahmo ilaha dhaqaale iyo baahida ardayga.

Waxaan sidoo kale muujineynaa barnaamijyada raadinaya in la saxo sinnaan la'aanta ay la kulmaan ardayda midabka leh. Kuwaas waxaa ka mid ah taageerada tacliinta, hababka kale ee ka duwan ee loo raaci karo edbinta, kor u qaadista kala-duwanaanshaha macalimiinta shaqaalaha, iyo adeegyada si loo daboolo baahiyaha aasaasiga ah.Ugu dambeyntii, waxaan muujinnaynaa barnaamijyo dhiirogelin u ahwaalidiinta muhaajiriinta iyo qoysaska. Qoysasku waa qayb muhiim u ah guusha ardaydga iskuulka. Sida ugu fiican oo ay u caawin karaan caruurtooda, waalidiinta iyo mas'uulka waa in loo sheegaa waxyaabaha laga filaayo iskuulka, horumarka ardayda, iyo waxyaabaha uu ka heli karo. Waxaan sharaxaad ka bixinaynaa hababka ugu fiican ee loo jiidan karo  waalidiinta muhaajirka ah, oo ay ka mid yihiin in aad u qabataan turjumaano, bixisaankulamo warbixineed oo loogu talogalay dadka muhaajiriinta ah, jadwalka shaqada iyo baahida gaadiidka, oo ay ku jiraan geedi socodka go'aan qaadashada iskuulka.

Takoorrida ama kala-saarka ku qoran warbixintan ayaa ah feejignaann walwal leh. Ma jiro qof, xaqiiqdii ma jiro caruur, waa in ay dareemaan dayacnaan, laga reebo, iyo dhibanayaal badan oo muhaajiriin ah oo ku nool Maine ayaa si joogta ah u sharaxay dareenkooda.

Laakiin waxaa jira sabab loo rajeynayo. Wadahadalka aan la yeelaney qoysaska muhaajiriinta ayaa na xasuusinaya xoogga iyo adkaysiga dhalinyarada, iyo jacaylka aan kalago,a lahayn iyo dadaalka waalidiinta. Waxaan helnay barbaariyaal dhiirigelin ah oo ka socda dhammaan gobolka oo ka go'an inay hagaajiyaan iskuulaadkooda. Waxay la wadaageen caqabadaha iyo guulaha ay rajeynayaan in warbixintan ay noqon karto aasaas khibrad wanaagsan oo loogu talogalay dhammaan ardayda ku sugan Maine.

Wixii macluumaad dheeraad ah, tag **www.aclumaine.org/webelonghere.**